

Wargeyska Mountain View

Maarso 2, 2016

Qamiis, Maarso 3.....Ardayda waxaa la fasaxi doonaa 12:40 p.m.
Jimco, Maarso 4.....Ma Jiro Dugsi, Maalinta Horumarinta Aqoonta Macalinka
Talaado, Maarso 8.....Waalidiinta iyo Macmacaanka, CLC Qolka 183, 8:15 a.m.
Isniin, Maarso 21-Jimco, Maarsho 25.....Ma Jiro Dugsi, Fasaxa Guga (Spring Break)

Fariinta Agaasimaha

Waxaan rabaa in aan u hambalyeeyo ardaydena darajada afaraad. Mountain View waxay qaadatay boqolkiiba buundada ugu sareyso ardayda ku fiican sayniskii dhawaanahaan marka la barbar dhigo dhamaan dugsiyada dagmadena. Waxaa sharaf noo ah dadaalka ay geysteen macalimiintena iyo ardaydena, waxaan ku faraxsanahay caalimiinta ay ku soo baxeen ardaydena.

Waalidiinta iyo Macmacaanka

Agaasimeyaasha waxay jecel yahiin in ay kula kulmaan, kula qeybsadaan waxa ku cusub Mountain View, iyo in ay ka jawaabaan su'aalaha laga yaabo in aad qabtid. Wada hadalkena xiga ee loo qabto Waalidiinta iyo Macmacaanka waxaa lagu qaban doonaa Xarunta Waxbarashada Bulshada (Community Learning Center) maaalinta Talaadada, Maarso 8, marka ay tahay 8:15 a.m. Waxaan rajeyneynaa in aan halkaas kugu aragno.

Barnaamijka Fruttada iyo Khudaarta Saafiga:

Waxan u mahad celineynaa Xafiiska Waxbarashada Gobolka Utah maalgelinta uu siiyay Mountain View si aan uga qeybgalno Barnaamijka Fruttada iyo Khudaarta Saafiga. Barnaamijkaan wuxuu ardayda ka bixiyaa kharashka ku baxa cuntada fudud ee caafimaadka qabta maalmaha Talaadada iyo Qamiista. Wuxuu kaloo ardaydena tusaa fruttada iyo khudaarta aysan si wanaagsan u aqoonin, taasoo u ogolaata in ay iskudayaan raashin cusub, kana bartaan manaafacaadka ay u leeyahiin jirkena.

Ballet West Assembly

Bishii Febraayo 23, jileyaal ka socda Dheesha Galbeed (Ballet West) ayaa yimid dugsigena si ay ardaydena wax badan uga baaraan baalada. Waxay na bareen qaababka baalada, labbiska, tiiriyayaasha iyo soo saarka. Qaar ka mid ah ardaydena waxaa loo doortay in ay soo koraan miiska kaddibna isku dayaan sida loo dheelo baalada. Kaddibna dheeleyaasha waxay dheeleen qeyb ka tirsan baalada caanka ee "Nutcracker." Ardaydena iyo shaqaalaha waxay dhab ahaan ka heleen waxa ay kala kulmeen. Mahadsanid, Ballet West, in aad kartidiina nala qeybsataan.